


JADEECADA (MEASLES)



Jadeecadu waa cudurka ay sababto fayraska jadeecadu. Jadeecadu waxay ku bilaabantaa fayras, duuf, qufac, indho casaan ah, iyo hunguri xanuun. Waxaa raaca finan ku faafa jidhka guudkiisa. Jadeecada waxay keeni kartaa caabuqa dhegta iyo shuban. Saamayn halista ah ee aan wanaagsanay ee ka timaada jadeecada way dhici kartaa. Carruurta qaarkood waxaa ku dhici kara caabuqa sambabada (oof wareen) ama bararka maskaxda (bararka maskaxda) kaas oo wakhtiyada qaarkood dhimasho keeni kara.

Haddii aad ka shakido in ilmahaagu qabo jadeeco, soo wac adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka isla markaaba.

Hubso inaad ilmahaaga ka fogayso kuwa kale markay jiran yihiin.

Sida loo faafiyo?

- ▶ Jadeecadu waa fayras taas oo si fudud uga faafta qof ilaa qof.
- ▶ Fayraska waa mid ka mid ah cudurada sida fudud u faafa. Waxay dhex martaa hawada ama dhibicda candhuufta. Waxaa faafiya qofka jiran oo qufaca ama hindhisa.
- ▶ Fayraska jadeecadu waxa uu joogi karaa hawada ilaa labba saacdo ka dib marka qofka bukay uu joogay qolka.
- ▶ Dadka cudurka qaba waxay ku faafin karaan jadeecada kuwa kale afar maalmood ka hor ilaa afar maalmood ka dibfinanku markay soo baxaan.

Waa maxay calaamadaha iyo astaamahu?

- ▶ Duuf
- ▶ Xumad saraysa (waxay ka badnaan kartaa 104°F)
- ▶ Daal
- ▶ Qufac
- ▶ Indho casaan, biyo leh ama bakooro (“indho basali ah”)
- ▶ Finan cas oo leh buur-buur muuqda oo ka bilaabma fooda oo u socda ilaa gacmaha iyo lugaha saddex ilaa shan maalmood ka dib may calaamaduhu bilaabmaan.

Sidee looga hortaggi karaa jadeecada?

Qaabka ugu wanaagsan ee la isaga ilaaliyo in la qaado jadeecada waa in la is tallaalo!

- ▶ Tallaalka MMR waxa uu ka ilaaliyaa jadeecada qanjo xanuunka, jadeeca jarmalka.
- ▶ Labba tallaalka oo MMR ayaa looga baahanyahay ilaalinta buuxda. Tallaalka u horeeya waa in la siiyo 12 ilaa 15 bilood jirka, tallaalka labbaadna waa in la siiyo 4 ilaa 6 sano jirka.
- ▶ Carruurta 12 bilood ilaa 12 sano jirka waxay qaadan karaan tallaalka isku jirka ah ee MMRV, taas oo sidoo kale ka ilaalisa hablo baasta (hablo baas).

Kurayda iyo dadka waa wayn waa inay sidoo kale cusboonaadaan tallaalkoodu. Hubso inaad la hadasho adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaad wax ku saabsan in lagaa tallaalo jadeecada

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tallaalka, fadlan booqo: <https://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/mmr.pdf>

